

Emerald Ash Borer ee Minneapolis

Akri qoraalkan xambaarsan macluumaadka muhimka ah ee ku saabsan sida emerald ash borer u dhibaateyn karo geedka



Waa maxay emerald ash borer?

Emerald ash borer (EAB) waa cayayaan dila geedka ash. Waxaa laga helay Minneapolis waxayna u badan tahay in laga heli karo degmooyinka kale ee Degmada Hennepin. Waa ay u badan tahay in geed kasta oo ash ah oo ku yaala magaalada Minneapolis oo aan laga daweyn inuu ku faafayo cudurka. Waa ay qaadanysaa dhawr sano in geedka ash lagu arko calaamadaha EAB ee faafa, xitaa haddii geedku u muuqdo mid caafimaad qaba, iyada oo laga yaabo inuu cudurku ku dhacay.



**Gedaha laga helo EAB
waxa ay noqdaan
kuwo diciif ah oo
khatar ku ah hantida
iyo dadka.**

Sidee ayaan ku garan karaa geedka ash?

Waxaa jira noocyoo kala duwan ee geedka ash ee Minneapolis - cagaar, caddaan iyo madow Sidan ayaad ku garan kartaa geedka ash:



Calaamaduhu waxa ay u baxaan iyaga oo iska hor imaanaya.



Laan kasta waxaa ka farcama 5-9 xuubnood oo caleemo xambaarsan.



Jiriddu waxa ay noqotaa qaab wareeg ah oo kale.



Mirihu waxa ay noqdaan kuwa madaxa u balaaran oo soo laalaada.

Maxaan sameyn karaa?

- Daawee geedkaaga ash: geedaha ash waxaa lagu daweyn karaa cayayaan dile, laakiin waa marka ay ka soo baxaan calaamadaha EAB, waxaa laga yaabaa in ay tahay xili dambe oo daawadu aanay waxba ka qaban karin. Geedka oo lagu daweynta cayayaan dile waxaa laga yaabaa in ay ka kharash yar tahay in la gooyo geedka. Daaweynta waa in lagu celceliyaa dhawrkii sanaba mana jiro balanqaad in geedku badbaadayo. La xiriir aqoon yahan heysta oo ku takhasusay si aad u ogato in geedka la daaweyn karo. Soo booqo www.minneapolismn.gov/tree-contractors si aad u aragto liiska hay'adaha ku takhasusay ee Minneapolis.
- Goynta geedka: haddi uu gedka si aad u daran ugu faafo cudurka ama aanay daaweytu shaqeyn weydo, waa in la gooyaa.
- Beerista geed cusub: ka dib marka la gooyo geedka uu cudurku ku dhacay, waxa aad beeri kartaa geed cusub.

Emerald Ash Borer ee Minneapolis

Waa maxay calaamadaha iyo waxyaabaha lagu garto faafitaanka emerald ash borer?

- Tartiib tariib dhimanaya (Canopy dieback): caleemaha kore ama qeybta kore ee geedka ayaa bilaabeysa in ay dhimaneyso, si tartiib tariib ah, taasoo ugu dambeynta ku faafitaanka emerald ash borer oo dhan.
- Laamo ka baxa geedka salkiisa: waxa ay astaan u tahay in xididada ama salka geedka uu culeys badan saaran yahay.
- Shimbirka geedaha qoda oo ku soo noqnoqda geedka: Shimbirku waxa uu qodaa geedaha si ay cunaan ugxanta EAB ee qolofka jiridda iyo laamaha.
- Jiridda oo qolofka ka daato: oo ay ugu wacan tahay inay khafiif noqoto ama dildilaaco shimbirka qoda darteed taasoo marka dambe ka soo dhacda.
- Dilaac gala jiridda geedka ama laamaha oo ka soo daata jiridda: duleel ka sameysma qolofka geedka hoostiisa taasoo keenta in ay kala furanto oo dilaacdho.
- Qolofka jiridda geedka oo hoosta ka bolosha: waxyaabo ku urura qolofka jiridda hoostiisa
- Godad yaryar oo ku sameysma jiridda oo u eg qaabka D: raadka ay caleenta ku reebaan ee ku sameysa caleenta muuqaal u eg xarafka D oo ah marka ay ka baxayaan geedka.

Sawiradan waxa ay muujinayaan calaamadaha iyo waxyaabaha lagu aqoonsado geedaha ay ku dhahaan EAB:



Soo booqo www.minneapolismn.gov/CityTrees si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku qoran luqadaha kale.

Xuquuqda Sawirka

Waaxda Beeraha Ee Mareykanka (caleenta EAB) (U.S. Department of Agriculture (EAB on leaf), Hennepin County Master Gardeners (tree damage), U.S. Forest Service Region 5 (EAB in firewood), David Wright (ash tree), Lindy Buckley (ash leaves), Eli Sagor (Black ash bark), a200/a77Wells (ash seeds); sawirada oo dhan waxaa laga heli karaa flickr.com waxaana la isticmaalay iyada oo ogolaaasho laga helay Creative Commons license 2.0

Eric R. Day, Virginia Polytechnic Institute and State University, Bugwood.org (canopy); Minnesota Department of Agriculture (tree damage, exit holes and blinding); Joseph O'Brien, USDA Forest Service, Bugwood.org (sprouts)

For reasonable accommodations or alternative formats please contact health@minneapolismn.gov or 612-673-2301. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850. Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab 311. Hadii aad Caawimaad u baahantahay wac 311.